# Xaqa uu qof ku leeyahay booliiska hortiisa

Warqadahaan waxaasoo saaray iskaashiga u dhaxeeya hay'adda isuduwidda qaxootiga Genevaiyo Rugta Sharci dejinta ee jaamacadda Geneva. Waxay ku wajahan yihiin caruurta aan qaan gaarin iyo kuwa qaan gaarka ah ee aan lala socon oo ku nool Geneva. Waxay uyeedadooda tahay in ay ku wargeliyaan sida ugu fudud xuquuqaha qaarkood ay ku leeyihiin bulshada dhexdeeda. Wixii macluumaad dheeraad ah iyo faahfaahin , waxaad kala socon kartaa buug-yaraha ku yaal xuquqda loo dajiyay dhallinyarada muhaajiriinta aan lala socon ee Rugta Sharciga.

**Waa maxay xaaladdayda sharci ahaan haddii aan joogo Switzerland sharci la'aan iyo waa maxayna khataraha ?**

Haddii aadan haysan sharci degenaansho,aadna timaado Switzerland sharci la'aan, joogitaankaada waxuu jebiyaa ama meel uga dhacaa sharciga u degsan Switzerland. Haddii ay mas'uuliyiintu ogaadaan, waxaad halis ku tahay in lagaa mamnuuco joogitaanka dalka, ama in xabsiga lagu dhigo ,iyadoo la qoorsheynaayo masaafurintaada.

**Xaaladee ama goormee ayuu booliisku hubin karaan aqoonsigayga?**

Booli isku waxay xaq u leeyihiin inay hubiyaan aqoonsigaaga kaliya haddii ay kaa shakiyaana inaad dembi gashay, waa iney noqdaan booliska kuwo wax kala saari kara.

Baaritaanka aqoonsiga waa inuusan dhicin sabab la'aan. Midabka maqaarkaaga ama asalkaaga qowmiyadeed waa inaysan noqon sababo la taaban karo oo lagu tuhmo dembi kasta ama in aad aqoonsigaaga saxaneyn.

→ Talo wax ku ool ah ! Ha ka hor imaan hubinta ama baaritaanka,aqoonsiga sababtoo ah waxay ka dhigan tahay dembi. Haddii aad tahay dhibbanaha ku dhacay kontorool aan ixtiraamin sharciga dalka, ha iska caabin ama ha diidin baritaankaas, sababtoo ah waxaad halis u tahay ganaax, iyo xataa in lagugu sameeyo gacan ka hadal ka timaada booliiska.

Marka baaritaanku uu dhammaado, waxaad qaadi kartaa tilaabo sharci ah oo aad dacwad ku xaraysan kartaa ama furi kartaa. Haddii xaaladaan oo kale aad la kulantid, waxaa si adag lagugula talinayaa inaad la xiriirto xirfadle sharci yaqaan.

**Ilaa intee ayay boolisku igu hayn karaan xabsiga ?**

Haddi booliisku kaa shakiyo inaad dambi gashay, way ku xiri karaan si ku meel gaar ah, waxayna ku geyn karaan xabsiga saldhiga booliiska. Laakin waa in si la taaban karo laguugu tuhmo in aad dambi gashay.Tusaale ahaan, waa in lagugu qabtay fal aan wanaagsaneyn, ama waa in ay jiraan tilmaamo cad oo ku socoda jihadaas.

Haddii aadan haysan sharci degenaansho oo sax ah, booliisku wuxuu ku geyn karaa saldhigga booliiska.

# Xaqa uu qof ku leeyahay booliiska hortiisa

**Ilaa intee ayay boolisku igu hayn karaan xabsiga ?**

→ Talo wax ku ool ah ! Laguguma hayn karo saldhiga in ka badan 24 saacadood laga bilaabo qabsashadaada. Haddii tuhunka booliiska la xaqiijiyo, booliisku waa inuu ku horgeeyaa xeer illaaliyaha (MP) 24 saac gudahood. Haddii kale, waa inay ku sii daayaan.

Waxaad xaq u leedahay turjumaan inta lagu guda jiro dhageysiga dacwadaada. Haddii aadan fahmin waxa lagu weydiinayo inta lagu jiro su'aalaha, wax walba ha ka jawaabin waxna ha saxiixin! Waxaad xaq u leedahay inaad wacdo qof aad ku kalsoon tahay marka aad ku jirto xabsiga booliiska. Qofka aad ku kalsoontahay wuxuu noqon karaa tusaale ahaan saaxiib ama qaraabo.

**Ilaa goormee ay si ku meel gaar ah la ii hayn karaa ?**

Haddii si cad oo aan shaki ku jirin lagugu tuhmo inaad gashay dambi ama fal dambiyeed, waxaa laga yaabaa in amar lagu bixiyo in lagugu haayo xabsiga.
Laakin, waa in ay jiraan calaamado raad halis ah oo muujinaya dambigaaga iyo sidoo kale eedeymo kugu filan..Xaalado kale ayaa jira kara :

- waa in ay jiraan khataro ama cabsi la qabo in aad baxsatid
- waa in ay jiraan khataro aad u sababi karo in caddaynta dacwadda raadkeeda aad tirtirto, ama aad la xiriirto markhaatiyaasha ama eedaysanayaasha kale, tusaale ahaan, waa in ay jirto khatar soo noqnoqonaysa.

Haddii aadan sharci ku joogin Switzerland ama xataa aadan haysan dukumentiyo aqoonsi, waxaad halis sare ugu jirtaa in si ku meel gaar ah lagugu hayo saldhigga, sababtoo ah maamulka ayaa ka baqaya inaad cararto inta lagu jiro nidaamintaada. Xabsiga ku meel gaarka ah, ma jiro muddo badan oo lagugu hayn karo.

**Xaq ma u leeyahay qareen (lab/dheddig) (avocat-e) iyo goormaa ?**

Waxaad xaq u leedahay inaad qareen hesho laga bilaabo dhegeysiga ugu horreeya ee booliiska.

Haddii aadan haysan lacag kugu filan oo aad ku bixiso adeegga qareen ama sharciyaqaan; adeegaas oo ay jirto fursad aad ku guuleysan karto kiiskaaga oo danahaagu kuu caddeeyo, waxaad xaq u leedahay inaad codsato oo aad hesho kaalmo sharciyaqaan wareysiga koowaadba.

Haddii aad gasho dambi uu xukunkiisu noqon karo wax ka badan hal sano oo aadan haysan wax aad iskaga difaacdo, waxaad ku jirtaa kiis difaac qasab ah. Tani waxay ka dhigan tahay in maamulku kuu magacaabi doono qareen ama sharci-yaqaan . Xaaladdan oo kale, haddii aadan haysan qaab aad isku difaacdo,oo aad haysato fursad aad ku guuleysan karto, markaa waxaad ka heli kartaa gargar sharci yaqaan wareysiga koowaadba.

# Xaqa uu qof ku leeyahay booliiska hortiisa

**Xaaladdee ama waqtigee ayay booliisku ku samayn karaan baaritaan ?**

Baaritaanku waa marka oo booliisku yimaado gurigaaga si ay u baaraan qolkaaga, guud ahaan aqalkaaga. Marka laga reebo xaalad degdeg ah, waa lagama maarmaan in booliisku haysto warqad qoraal ah si ay u awoodaan inay soo galaan gurigaaga. Qoraalkaas ay sitaan waa inuu si qeexan ah u sheegaa :

- Magaca qofka la baarayo iyo goobta, dukumentiyada ama walxaha la baarayo
- ujeedada baaritaanka
- maamulka ama dadka mas'uulka ka ah fulinta amarka.

**→ Talo wax ku ool ah ! Haddii baaritaan kugu socdo, waa inaad weydiisaa booliiska, in ay haystaan ruqsad maxkamadeed, iskana hubisaa.**

Maamulka booliska waxa kaliya oo ay baari karaan dadka ay warqada ruqsada baaritaanka khuseyso, sidaas darteed, haddii booliisku uu haysto ruqsad toos u khuseysa qof dhallinyaro ah, ma baari karaan haddii ay la kulmaan dhalinyaro kale oo isna goobtaasi ku sugan.

**Maxaan samayn karaa haddii booliisku igu xadgudbo ?**

Haddii lagugu xad gudbay, waxaad u gudbin kartaa dacwad dambi ah ku socoto Xeer Ilaaliyaha Guud. Laakiin taas, ka hor waa inaad la tashataa dhakhtar oo aad ka haysataa shahaado caddaynaysa in si xun laguula dhaqmay. Haddii booliisku kuu diido inaad la tashato dhakhtar, waa inaad ku qortaa arintaas diidmada ah warbixinta oo booliska kaa qoraayo, la tasho dhakhtarka kuu gaarka ah sida ugu dhaqsiyaha badan. Waa inaad ogaataa guud ahaan, in haddii aad gudbiso dacwad ka dhan ah booliiska, booliiskana ayaa isna dhankiisa dacwad gudbinaya siduu kuu sumcad dilo. Xildhibaanku booliiska waxa uu markaa qiimayn karaa labada dacwadood isaga oo aan dabagal ku samayn, iyadoo dhici karto in aad gar kaga heli karto .
Haddii aadan rabin inaad xareyso cabasho ama dacwad, waxaad sidoo kale qori kartaa warqad aad ku qeexayso xaqiiqooyinka dhacay oo aad weydiisato sharaxaad, taliyaha booliiskal Tani waxay ka tageysaa diiwaan qoran waxayna ku qasbeysaa taliyaha booliiska inuu la socdo xaaladaada oo uu ka bixiyo jawaab.

→ Talo wax ku ool ah ! Markhaatiyada booliisku waxey leeyihiin tixgelin oo sugan go'aankooda. Taas macneheedu waxaa weeye in marag-furka booliisku uu yahay caddaynta laftigiisa maxkamadda horteeda .Sidaa darteed waa sababta ay muhiim u tahay in dhinacaaga aad ururiso dhammaan caddaynta suurtogalka ah sida muuqaal fiidiyow ah.
Samee warbixin caafimaad sida ugu dhaqsiyaha badan .

# Xaqa uu qof ku leeyahay booliiska hortiisa

**Halkee ayaan tagaa marka aan ahay dhibbane dambiga dhacay?**

Booliiska ayaa kontroola laakiin waxay sidoo kale u joogaan inay dadka ilaaliyaan. Haddii aad tahay dhibbane dembi, waxaad aadi kartaa saldhigga booliiska oo aad u sharaxi kartaa xaaladdaada, gaar ahaan haddii kiiska uu yahay xatooyo. Si kastaba ha ahaatee, ka digtoonow, haddii aanad lahayn sharci ku joog, arrintu. dib ayey kugu soo noqon kartaa.

Waxaa kale oo aad la xiriiri kartaa xarunta LAVI oo ah xarunta la tashiga ee Geneva ee dhibanayaasha dambiyada. Waxaad ka heli kartaa lambarkooda iyo ciwaankooda hoostani. Xaruntani waxay kugu kaalmayn kartaa caawino nafsaani, sharci, bulsho, caafimaad iyo/ama qalab. Xaruntu waxay xaqiijin kartaa la socodkaaga inta lagu jiro dacwadaha dembiyada (tusaale ahaan inaad cabasho gudbiso).
Waa in aad xasuusataa in aad haysato 3 bilood marka aad dembiga lagaa galay si aad cabasho u gudbiso. Kuma qasbanid inaad cabasho u gudbiso saldhiga booliiska. Waxaad cabasho u gudbin kartaa MP. Cabashada waxay noqon kartaa hadal ama qoraal, haddii ay tahay hadal, waxaa lagaa qori doonaa warbixin.

→ Talo wax ku ool ah ! Si taxadar leh u akhri warbixinta marka aad dacwad gudbiso, oo hubso in wax kasta oo la qoray ay yihiin kuwo aad adigu sheegtay.

**Cinwaanada iyo rugtooda**

**Xafiiska joogtada sharciga ee loo yaqaan MNA/RMNA** (bilaash, balan la'aan, Khamiis 12:30 p.m. ilaa 1:30 p.m.), Rue des Amis 6

**Xafiiska sharciga ee SILURE** (bilaash, balan la'aan, Sabti 10:30 a.m. ilaa 12:30 p.m.), pjsilure@protonmail.com, Sentiers des Saules 3.

**Xafiiska sharciga ee ardayda** (bilaash, balan), info@pjege.ch.

**Xafiiska sharciga ee Plainpalais** ( balan)**,** info@pj-plainpalais.ch, +41 22 502 76 56, Boulevard Georges-Favon.

**Ururka Geneva Xarunta La-tashiga Dhibanayaasha Dambiyada (LAVI),** +41. Q2, Boulevard de Saint-Georges 72.